

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD



ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

SANADKA 21^{AAD}

CADADKA 9^{AAD}

TAARIIKH: 03/01/21

Lam. 01

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

SHARCIGA DIIWAAN-GELINTA COD-BIXIYEYAASHA
DOWLADDA PUNTLAND

TUSMADA	
Qeybta 1 ^{aad}	<i>Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah Sharciga Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha Dowladda Puntland</i>
Qeybta 2 ^{aad}	<i>Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 3 ^{aad}	<i>Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 4 ^{aad}	<i>Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 5 ^{aad}	<i>Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH



DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA



ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lr.01 ee 1^{da} March 2021, kuna saabsan Sharciga Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha Dowladda Puntland

Madaxweynaha Dowladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80^{aad} farqadiisa 16^{-aad} iyo Qodobka 64^{-aad}.

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/12/2021, kuna taariikhaysan February 15, 2021.

Markuu tixgeliyey: Muhiimada Xeerkani u leeyahay Diwaangelinta Cod-bixiyeyaasha.

Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda:

Qodobka 1^{aad}

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha Dowladda Puntland.

Qodobka 2^{aad}

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinaayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

Qodobka 3^{aad}

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

Siciid Cabdullaahi Deni
Madaxweynaha Dawladda Puntland



DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA



ولاية بونت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:- XGGW/DPL/12/2021

Garoowe, Isniin

Taariikh:- 15/02/2021

Ku: - Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeedo:- Ansixinta Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha ee Puntland

Mudane Madaxweyne,

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -

MARKUU ARKAY: -

MARKUU ARKAY: -

MARKUU ARKAY: -

Dastuurka Dawladda Puntland Qodobka 64-aad

Dastuurka Dawladda Puntland Qodobka 41-aad.

Soo gubbinta Madaxweynaha Ref:MW/DPS/MW/
122/2020 ee December, 5, 2020 kuna saabsanaa

Ansixinta Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyaha.

MARKUU TIX-GELIYEY: -

Muhiimadda ay leedahay Diiwaan-gelinta cod-
bixiyeyaasha.

MARKUU DHEGEYSTHEY: -

Dooddii iyo go'aankii Golaha Wakiilladu ku
ansixiyey kalfadhiga 47-aad Fadhigiisii 26-aad ee
04/02/2021, Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-
biyeyaasha Puntland oo ay goob joog ahaayeen **42**
Mudane oo ka mid ah mudanayaasha Golaha
Wakiillada.

MARKUU ARKAY:-

Go'aankii Golaha Wakiilladu ay cod aqlabiyad ah
(40) Mudane oo gacan taag ah ku ansixiyeen Xeerka
Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha Puntland, halka
ay diideen **(2)** mudane, mana jirin cid ka aamustey.

WUXUU GUDDOOMIYEY: -

Ansixinta Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha Dawladda Puntland.

Wada Shaqeyn Wacan

Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.





**DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND**


**XEERKA DIIWAAN-GELINTA COD-BIXIYEYAASHA
DAWLADDA PUNTLAND**

GAROOWE, FEBRAAYO, 2021

TUSMO

Bogga

.....	i
QAYBTA 1-AAD.....	1
QODOBO HORDHAC AH	1
Qodobka 1-aad	1
Magaca Xeerka	1
Qodobka 2-aad.....	1
Erey-Bixin.....	1
Qodobka 3-aad.....	3
Baaxadda Xeerka.....	3
QAYBTA 2-AAD	3
HANNAANKA DIIWAAN-GELINTA	3
Qodobka 4-aad	3
Awoodaha Guddiga Doorashooyinka ee La Xiriira Diwaan-Gelinta.....	3
Qodobka 5-aad.....	4
Dadka Xaqa U-Leh Is-Diiwaan-Gelinta	4
Qodobka 6-aad	4
Ansax Ahaanta Kaadhadhka Cod-Bixinta	4
Qodobka 7-aad.....	4
Xogta Foomka Diiwaan-Gelinta	4
Qodobka 8-aad	5
Habka Diiwaan-Gelinta	5
Qodobka 9-aad	5
Waqtiga/saacadaha Diiwaan-Gelinta	5
Qodobka 10-aad	5
Goobaha Diiwaan-Gelinta Cod-Bixiyeyaasha	5
QAYBTA 3-AAD	6
KAALINTA URURADA/XISBIYADA, GOOB JOOGAYAASHA IYO SAXAAFADDA EE LA XIRIIRA DIIWAAN-GELINTA.....	6
Qodobka 11-aad	6
Wakiillada Ururada/xisbiyada	6
Qodobka 12-aad.....	6
Goob-joogayaasha.....	6



Qodobka 13-aad.....	6
Saxaafadda.....	6
QAYBTA 4-AAD.....	7
HIR-GELINTA DIIWAAN-GELINTA.....	7
Qodobka 14-aad.....	7
Sugidda Amniga.....	7
Qodobka 15-aad.....	7
Xiritaanka Hawsha Diiwaan-Gelinta iyo Wareejinta Agabka.....	7
Qodobka 16-aad.....	7
Liisaska Hordhaca Ah ee Diiwaan-Gelinta.....	7
Qodobka 17-aad.....	8
Cabashooyinka La Xiriira Liisaska Hordhaca Ah.....	8
Qodobka 18-aad.....	8
Foomka Cabashada.....	8
Qodobka 19-aad.....	9
Waqtiga La Gudbin Karo Cabasho.....	9
Qodobka 20-aad.....	9
Go'aan Ka Gaarista Cabashooyinka La Xiriira Liistada Hordhaca Ah.....	9
Qodobka 21-aad.....	9
Guddiga Xalinta Cabashooyinka Diiwaan-gelinta Cod-Bixiyeyaasha.....	9
QAYBTA 5-AAD.....	10
SOO SAARISTA LIISKA KAMA DAMBAYSTA AH EE DIIWAAN-GELINTA.....	10
Qodobka 22-aad.....	10
Diiwaanka Cod-Bixiyeyaasha ee Kama Dambaysta Ah.....	10
Qodobka 23-aad.....	10
Kaadhka Cod-Bixiyaha.....	10
Qodobka 24-aad.....	10
Qaybinta Kaadhka Cod-Bixinta.....	10
Qodobka 25-aad.....	11
Lumidda Kaadhka Cod-Bixinta.....	11
Qodobka 26-aad.....	11
Wax-Ka-Bedelka Diiwaanka Cod-Bixinta Rasmiga Ah.....	11
Qodobka 27-aad.....	12



Reebanaanta Hal Kaadh Wax-Ka-Badan	12
Qodobka 28-aad	12
Xogta Khaldanta	12
QEYBTA 6-AAD	12
WACYI-GELINTA DIIWAAN-GELINTA	12
Qodobka 29-aad	12
Wacyi-Gelinta Diiwaan-Gelinta Cod-Bixiyeyaasha	12
Qodobka 30-aad	12
Wacyi-Gelinta	12
QAYBTA 7-AAD	13
QODOBO GUUD	13
Qodobka 31-aad	13
Lahaanshaha iyo Haynta Diiwaanka	13
Qodobka 32-aad	13
Ciqaabaha La Xiriira Xad-gudubyada Diiwaan-Gelinta	13
Qodobka 33-aad	13
Reebanaanta Olole Ka-Samaynta Goobta Diiwaan-Gelinta	13
Qodobka 34-aad	13
Xeer-Nidaamiyeyaal	13
Qodobka 35-aad	14
Burin/Laalid	14
Qodobka 36-aad	14
Dhaqan-galka Xeerkan	14



QAYBTA 1-AAD

QODOBO HORDHAC AH

Qodobka 1-aad

Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa “Xeerka Diiwaan-Gelinta Cod-Bixiyeyaasha Dawladda Puntland”

Qodobka 2-aad

Erey-Bixin

Haddii aan Xeerkan si kale loogu sheegin, macnaha ereyada soo socda waxaa loola jeedaa sidan;

- Dastuur:** Waxaa loola jeedaa Dastuurka dawladda Puntland ee Soomaaliya.
- Muwaadin:** Waxaa loola jeedaa qof kasta oo buuxiyey Shuruudaha ku xusan qodobka 39-aad farqadiisa 1-aad ee dastuurka Puntland.
- Cod-bixiye:** Waxaa loola jeedaa muwaadin kasta oo xaq u leh inuu cod bixiyo, gaadheynta da'da sideed iyo toban (18) sano.
- Kaadhka Aqoonsiga:** Waxaa loola jeedaa kaadhka aqoonsiga Muwaadinimo.
- Kaadhka Cod-bixinta:** Waxaa loola jeedaa kaadhka la siiyo cod-bixiyaha marka la diiwaan-geliyo.
- Guddi:** Waxaa loola jeedaa guddiga doorashooyinka Puntland.
- Wasaarad:** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta Dawladda Puntland.
- Wakiil Urur/Xisbi:** Waxaa loola jeedaa xubinta uu urur/xisbi siyaasadeed u soo magacaabo inuu wakiil uga noqdo goobaha diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha.



- Goob-joogayaal:** Waxaa loola jeedaa kormeerayaasha Caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah ee hubinaya habsami u socodka doorashooyinka.
- Diiwaan-gelinta Muwaadinka:** Waxaa loola jeedaa diiwaan-gelinta muwaadin kasta oo reer Puntland ah oo ay samaysay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta Puntland.
- Cod-bixiyaha:** Waxaa loola jeedaa muwaadiniinta isu diiwaan geliya iney codeeyaan xilliga doorashooyinka Puntland uuna diiwaan-geliyey guddiga doorashooyinka Puntland.
- Diiwaanka Guud:** Waxaa loola jeedaa diiwaanka la dhigo xarumaha Wasaaradda iyo guddiga doorashooyinka, laguna kaydiyo xogta muwaadniinta iyo cod-bixiyeyaasha.
- Diiwaanka:** Waxaa loola jeedaa diiwaanka lagu qoro xogta muwaadniinta, warqadda aqoonsiga iyo codbixiyeyaasha ee goob doorasho kasta.
- Diiwaan-Gelin:** Waxaa loola jeedaa liisaska cod bixiyeyaasha ee uu diiwaan-geliyo Guddiga Doorashooyinka Puntland.
- Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha:** Waxaa loola jeedaa Guddiga ku Xusan qodobka 21-aad ee xeerkan.
- Xeerka Ciqaabta:** Waxaa loola jeedaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed Xeer (Lr.5) soona baxay sannadkii 1962.



Qodobka 3-aad
Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu maamulayaa guud ahaan arrimaha diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha Dawladda Puntland.

QAYBTA 2-AAD

HANNAANKA DIIWAAN-GELINTA

Qodobka 4-aad

Awoodaha Guddiga Doorashooyinka ee La Xiriira Diwaan-Gelinta

Iyadoon wax loo dhimayn awoodaha guddiga ee ku xusan dastuurka iyo qawaaniinta kale ee doorashooyinka, xeerkan waxaa uu awood u siinayaa Guddiga:

1. Dejinta qorshaha diiwaan-gelinta.
2. Isku duba-ridka barnaamijyada wacyigelinta dadweynaha ee ku aadan diiwaan-gelinta.
3. Kaydinta, hubinta, sixidda, cusboonaysiinta, soo saarista liisaska hordhaca ah iyo kuwa kama dambaysta ah ee diiwaanka cod-bixiyeyaasha.
4. Hirgelinta iyo maaraynta xarumaha diiwaan-gelinta ee gobollada iyo degmooyinka.
5. Go'aan ka gaaridda cabashooyinka la xiriira diiwaanka cod-bixiyeyaasha ee Puntland.
6. Shaqaaleynta hawl-wadeennada diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha Puntland.
7. Hindisidda hab raacyo iyo buug-gacmeedyo la xiriira hannaanka diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha.
8. Qorsheynta goobo diiwaan-gelineed oo ku jaango'an tirada gobollada iyo degmooyinka Puntland.
9. Soo diyaarinta Miisaaniyadda lagu fulinayo hawlaha diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha si waafaqsan qodobka 8-aad farqadiisa 21-aad ee Xeerka Guddiga Doorashooyinka (Xeer Lr.9).



Qodobka 5-aad

Dadka Xaqa U-Leh Is-Diiwaan-Gelinta

1. Qof kasta oo isku diiwaan-gelinaya cod-bixiye waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:
 - b. Waa inuu yahay qof u dhashay ama ku dhashay Puntland ama Puntlandnimada ku kasbaday sifo sharci ah.
 - t. Muwaadin Soomaaliyeed oo Puntland deganaa tobankii (10) sano ee ugu dambaysey.
 - J. Waa in aan da'diisu ka yarayn sideed iyo toban (18) sano.
 - x. Waa inuu maskax ahaan fiyow yahay.
 - Kh. Waa inaan shantii (5) sano ee ugu dambaysey maxkamad awood u lihi si kama dambays ah ugu xukumin denbi culus, oo ay raacisay inay laalan yihiin xuquuqdiisii siyaasadeed iyo inuusan qaban karin xafiis/jago dawladeed.
2. Muwaadinnimada qofka, waxaa saldhig u ah inuu leeyahay mid ka mid ah dokumeentiyada soo socda:
 - b. Waraaq dhalasho oo la aqoonsan yahay.
 - t. Kaadhka aqoonsiga Puntland.
 - j. Baasaboora Soomaali ah.

Qodobka 6-aad

Ansax Ahaanta Kaadhka Cod-Bixinta

Kaadhka cod-bixinta wuxuu ansax yahay muddo shan (5) sano ah, laga bilaabo maalinta la bixiyey.

Qodobka 7-aad

Xogta Foomka Diiwaan-Gelinta

1. Xogaha mudan tix-raac waa kuwa ku xusan foomka diiwaan-gelinta ee cod-bixinta.
2. Foomka diiwaan-gelinta waxa lagu qorayaa xogaha soo socda;
 - b. Magaca qofka oo afaran, una qoran si sax ah.
 - t. Sannadka iyo goobta dhalashada.
 - j. Jinsiga (dheddig ama lab).
 - x. Goob-doorasho ee uu cod-bixiyuhu ka bixinayo codka.
 - kh. Sawirka cod-bixiyaha.



- d. Saxiixa cod-bixiyaha ama noocyo kale ee saxiix (suulka, aalado tignoolaji ah), marka aanu qofku awoodin saxiix caadi ah.
 - r. Lambarka gaarka ah ee lagu diiwaan-geliyey cod-bixiyaha.
 - s. Lambarka tix-raaca diiwaan-gelinta cod-bixiyaha.
 - sh. Lambarka warqadda aqoonsiga.
3. Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu ku daro foomka diiwaan-gelinta, xog kasta oo muhiim u noqon karta qabsoomidda doorashada, iyadoo lagala tashanaayo ururada/axsaabta siyaasadda.

Qodobka 8-aad
Habka Diiwaan-Gelinta

1. Muwaadin kasta oo diiwaan-gashan, lana guddoonsiiyey kaadhka cod-bixinta, wuxuu xaq u leeyahay inuu codeeyo.
2. Ma jirto wax lacag ah oo laga qaadayo qofka is diiwaan-gelinaaya.
3. Guddigu wuxuu soo saarayaa liiska dadka is diiwaan-geliyey ugu yaraan labo (2) bilood ka hor maalinta doorashada.

Qodobka 9-aad
Waqtiga/saacadaha Diiwaan-Gelinta

1. Guddiga diiwaan-gelintu toban iyo shan (15) cisho ka hor waqtiga diiwaan-gelinta wuxuu wareegto ku soo saarayaa tariikhda ay bilaabaneyso diiwaan-gelintu.
2. Hawl-maalmeedka goobta diiwaan-gelinta waxaa la bilaabayaa **6:00** subaxnimo waxayna ku dhammaanaysaa **6:00** fiidnimo.
3. Diiwaan-gelintu way soconeysaa, oo waqtiga xiritaanka la tix-gelin maayo haddii ay jiraan muwaadiniin aan weli la diiwaan-gelin oo safka taagan ilaa ay ka dhammaanayaan.

Qodobka 10-aad
Goobaha Diiwaan-Gelinta Cod-Bixiyeyaasha

1. Waxaa dalka loo qaybinayaa goobo diiwaan-gelined, si waafaqsan gobollada ay Puntland ka kooban tahay.
2. Guddiga Doorashooyinka ayaa cayimaya goobaha diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha ee gobol iyo degmo kasta.
3. Guddigu wuxuu dejinayaa nidaam lagu kala garto goobaha diiwaan-gelinta, iyada oo uu siinaayo goob kasta tirsi lambar (code) oo gaar u ah.



QAYBTA 3-AAD

KAALINTA URURADA/XISBIYADA, GOOB JOOGAYAASHA IYO SAXAAFADDA EE LA XIRIIRA DIIWAAN-GELINTA

Qodobka 11-aad

Wakiillada Ururada/xisbiyada

1. Urur/xisbi kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu u soo magacawdo hal (1) wakiil goobta diiwaan-gelinta, kaasoo u-xil-saaran hubinta in uu hannaanka diiwaan-gelintu sharciga waafaqsan yahay.
2. Waa iney goob-joog ahaadaan wakiilka/wakiillada ururka/xisbiga xilliga diiwaan-gelintu ay socoto.
3. Ururka/xisbiga waa in ay soo magacaabaan wakiillada labataan iyo kow (21) maalmood ka hor waqtiga diiwaan-gelinta.
4. Guddigu kaadh aqoonsi wakiilnimo ayuu siinayaa wakiillada ururada/xisbiyada siyaasadda.
5. Guddigu wuxuu la saxiixanayaa wakiillada ururada/xisbiyada heshiish, in uu wakiil walbaa xushmeynayo anshaxa goobta diiwaan-gelinta.
6. Guddigu wuxuu ka fogeyn karaa goobta diiwaan-gelinta wakiilka ku kaca falal lid ku ah anshaxa iyo amniga goobta.

Qodobka 12-aad

Goob-joogayaasha

1. Goob-joogayaal ka socda gudaha iyo dibadda oo oggolaansho ka haysta Guddiga ayaa kor-joogteen kara hawsha diiwaan-gelinta.
2. Goob-joogayaashu waxay tegi karaan goob kasta oo diiwaan-gelin laga samaynayo, iyadoo raacaya tusmooyinka (guidelines) Guddiga Doorashooyinka.
3. Guddigu waxay goob-joogayaasha siinayaan kaadh aqoonsi goob-joogenimo.

Qodobka 13-aad

Saxaafadda

1. Saxaafadda Maxaliga ah iyo mida Caalamiga ahi waxay la socon karaan, isla markaana baahin karaan hawlaha diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha.
2. Saxaafadda ka haysata oggolaansho guddiga, waxay geli karaan goobaha diiwaan-gelinta waqtiyada ay shaqadu socoto, waana in ay sitaan kaadhahka aqoonsiga.
3. Saxaafadda guddigu u oggolaado kor-joogteen la socodka hawlaha diiwaan-gelinta, waa in ay dhowraan Xeerka Anshaha Saxaafadda ayna xushmeeyaan kan goobta diiwaan-gelinta.



QAYBTA 4-AAD
HIR-GELINTA DIIWAAN-GELINTA

Qodobka 14-aad
Sugidda Amniga

1. Guddigu wuxuu kala tashanayaa Wasaaradda Amniga iyo Taliyaha Booliiska, qaabka ugu habboon ee loo diyaarin karo ciidan suga amniga hawl-wadeennada iyo goobaha diiwaan-gelinta.
2. Guddigu wuxuu wacyigelin siinayaa ciidanka u-xil-saaran goobaha amniga diiwaan-gelinta.

Qodobka 15-aad

Xiritaanka Hawsha Diiwaan-Gelinta iyo Wareejinta Agabka

1. Markey dhammaato hawsha diiwaan-gelinta, Guddoomiyaha goobtu wuxuu diyaarinayaa wadarta tirada cod-bixiyeyaasha la diiwaan-geliyey, wuxuuna ku ridayaa baqshadaha loogu tala galay.
2. Guddoomiyaha goobtu wuxuu gal gaar ah ku ridayaa tirada foomamka xumaaday iyo diidmooyinka la bixiyey.
3. Baqshadaha waa la lingaxayaa, korkana waxaa looga dhufanayaa shaabadda goobta, waxaana korka wadajir uga saxiixaya Guddoomiyaha goobta iyo Xog-geliyaha.
4. Baqshadaha korkooda waxaa lagu qorayaa faallo ku saabsan waxa ku xafidan.
5. Guddoomiyaha goobta diiwaan-gelinta oo ay weheliyaan xubin hawl-wadeennada ka tirsan iyo Boolis ilaalo ah, ayaa ku wareejinaya xafiiska diiwaan-gelinta gobolka, qoraalka raadraaca ah iyo baqshadaha ay ku xafidan yihiin liisaska diiwaan-gelinta, muddo aan ka badnayn tobban iyo labo (12) saacadood marka ay diiwaan-gelintu dhammaato.
6. Marka xafiiska diiwaan-gelinta ee gobolka lagu wareejinayo qalabka iyo baqshadaha, waa inuu guddoomiyaha gobolku bixiyo caddaynta la wareegidda agabkaas.

Qodobka 16-aad

Liisaska Hordhaca Ah ee Diiwaan-Gelinta

1. Marka ay dhammaato muddada diiwaan-gelinta, guddiguna xaqiijiyo in ay si habsami ah hawshu u dhacday, wuxuu si hordhac ah u soo saarayaa liisaska cod-bixiyeyaasha.
2. Liisaska cod-bixiyeyaasha ee hordhaca ah waxaa loo diyaarinayaa goob kasta oo cod-bixineed. Diiwaanka liisaska cod-bixiyeyaasha waxaa lagu muujinayaa, lambarka gaarka ah ee cod-bixiyaha, magaca oo afar, da'da, taariikhda iyo goobta dhalashada, jinsiga, sawirka qofka iyo goobta cod-bixinta.
3. Liisaska cod-bixiyeyaasha ee hordhaca ah, wuxuu guddigu soo dhejinayaa kadib marka uu dhammaystiro diiwaan-gelinta dhammaan gobollada.



4. Guddigu waxaa kale oo uu soo dhejinayaa liisaska cid kasta oo hal mar wax ka badan is-diiwaan-gelisey.
5. Guddigu todobaad ka hor inta uusan soo saarin liisaska hordhaca ah, wuxuu soo saarayaa ogeysiin ku saabsan waqtiga iyo goobta lagu soo dhejinayo liisaska hordhaca ah ee cod-bixiyeyaasha.

Qodobka 17-aad
Cabashooyinka La Xiriira Liisaska Hordhaca Ah

1. Marka la soo saaro liisaska hordhaca ah ee cod-bixiyeyaasha, waxaa cabasho laga qaban karaa qofkii haysta waraaqda aqoonsiga cod-bixiye.
2. Cabashooyinka mudnaanta leh waa kuwa la xiriira arrimaha soo socda:
 - b. Haddii cod-bixiyaha lagu qoray goob cod-bixin oo aan ahayn tii uu u doortay;
 - t. Haddii aan la diiwaan gelin muwaadin haysta caddayn, in uu buuxiyey shuruudihii.
3. Cabashada waa in lagu soo gudbiyaa foomka loogu talo galay ee ku keydsan goobaha diwaan-gelinta.
4. Ururada/axsaabta siyaasadu waa in ay cabashada ku soo gudbiyaan todoba (7) cisho gudahood, oo ka bilaabmata maalinta ay soo baxeen liisaska hordhaca ah ee cod-bixiyeyaasha.
5. Ururada/axsaabta siyaasaddu waxay ka caban karaan arrimaha soo socda:
 - b. In la diiwaan-geliyey dad aan buuxin shuruudaha cod-bixiyeyaasha ee ku xussan qodobka 5-aad ee xeerkan.
 - t. In aan la diiwaan-gelin dad buuxiyey shuruudihii cod-bixinta ee ku xussan qodobka 5-aad ee xeerkan.

Qodobka 18-aad
Foomka Cabashada

1. Guddigu waa inuu hubiyaa in ay goob kasta ku diyaarsan yihiin foomamka cabashada.
2. Guddiga Doorashooyinku wuxuu magacaabayaa Guddiga Xalinta Cabashooyinka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha.
3. Xafiiska gobol haduusan wax ka qaban karin cabashada, waa inuu u wareejiyaa Guddiga Xalinta Cabashooyinka Diiwaan-gelinta.
4. Qof kasta oo ku qanci waaya go'aanka xafiiska heer gobol, waxa uu xaq u leeyahay inuu cabashadiisa u gudbiyo Guddiga Xalinta Cabashooyinka Diiwaan-gelinta.
5. Ciddii ku qanci weyda go'aanka Guddida Xalinta Cabashooyinka Diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha, waxay dacwo ka furan kartaa Maxkamadaha awoodda u leh ee Puntland.



Qodobka 19-aad
Waqtiga La Gudbin Karo Cabasho

Cid kasta oo ka cabaneysa xogta ku qoran liisaska hordhaca ah, waa inuu cabashadiisa ku gudbiyaa todoba (7) cisho gudahood, laga bilaabo maalinta la soo saarey liisaska hordhaca ah.

Qodobka 20-aad
Go'aan Ka Gaarista Cabashooyinka La Xiriira Liistada Hordhaca Ah

1. Cabashooyinka la xiriira liisaska hordhaca ah, waxaa go'aan ka gaaraya maaamulka Guddiga heer gobol, una gudbinaya Xarunta Dhexe ee Guddiga, inuu saxo qaladaadka saldhigga u ah cabashada.
2. Haddii cabashadu khuseyso arrimo farsamo, guddoomiyaha gobolku wuxuu u gudbinayaa Guddiga Xalinta Cabashooyinka Diiwaan-gelinta ee ku xussan qodobka 21-aad ee xeerkan, si ay u xaliyaan arrinta laga cabanaayo.
3. Cabasho kasta waxa go'aan looga gaarayaa muddo toban (10) cisho gudahood ah.
4. Go'aanka waxaa lagu soo dhejinayaa goobaha lagu dhejiyey liistada hordhaca ah ee cod-bixiyeyaasha.

Qodobka 21-aad
Guddiga Xalinta Cabashooyinka Diiwaan-gelinta Cod-Bixiyeyaasha

1. Xeerkani waxuu asaasayaa Guddiga Xalinta Cabashooyinka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha oo awood u leh go'aan ka gaaridda cabashooyinka la xiriira diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha.
2. Guddiga Xalinta Cabashooyinka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha ee maaamul, waxaa xarun u ah Xarunta Guud ee Guddiga Doorashooyinka.
3. Guddiga Xalinta Cabashooyinka wuxuu ka kooban yahay todoba (7) xubnood oo kala ah:
 - b. Saddex xubnood oo ka tirsan Guddiga.
 - t. La-taliyaha arrimaha sharciga ee Guddiga.
 - j. Madaxa Waaxda diiwaan-gelinta Guddiga.
 - x. Madaxa Waaxda Hawl-gelinta (operations) ee Guddiga.
 - Kh. Madaxa Waaxda Farsamada (IT) ee Guddiga.
4. Inta ay socoto diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha waxay xubnaha Guddiga Xalinta Cabashooyinka Diiwaan-gelinta ee maamul, ka hawl-geli karaan kolba gobolka ay ka socoto diiwaan-gelinta, iyaga oo cabashooyinka soo gaara go'aan uga gaaraya muddo aan ka badnayn toban (10) cisho.



QAYBTA 5-AAD

SOO SAARISTA LIISKA KAMA DAMBAYSTA AH EE DIIWAAN-GELINTA

Qodobka 22-aad

Diiwaanka Cod-Bixiyeyaasha ee Kama Dambaysta Ah

1. Guddigu marka uu saxo qaladaadka go'aanna uu ka gaaro cabashooyinka, wuxuu soo saarayaa diiwaanka cod-bixiyeyaasha ee kama dambaysta ah, kaasoo u qaabeysan heer gobol, degmo iyo goob cod-bixineed.
2. Diiwaanka cod-bixiyaha wuxuu noqonayaa xog lagu keydiyo qalabka kombiyuutarka, waana diiwaan kulmiya dhammaan xogaha laga qoro muwaadinka loo diwaan-geliyey cod-bixiye.
3. Diiwaanka cod-bixiyeyaasha waa hanti dawladeed, guddiga ayaana u-xil-saaran xafididda iyo ilaalintiisa.
4. Waxa reeban in xogta iyo macluumaadka ku jira diiwaanka cod-bixiyeyaasha laga saaro Puntland gudaheeda.

Qodobka 23-aad

Kaadhka Cod-Bixiyaha

Kaadhka cod-bixiyaha waa inuu ka sameysan yahay aalad aan si fudud u burburayn ama macluumaadku uga tirmi karin, aan la been abuuri karin ama wax laga bedeli karin.

Qodobka 24-aad

Qaybinta Kaadhka Cod-Bixinta

1. Qof kasta oo ku jira diiwaanka cod-bixinta ee kama dambaysta ahi waxa uu xaq u leeyahay in la siiyo kaadhka cod-bixinta.
Kaadhka cod-bixinta waxaa ku qoran macluumaadka soo socda:
 - b. Magaca qofka oo afaran.
 - t. Sawirka cod-bixiyaha.
 - j. Lambarka warqadda aqoonsiga.
 - x. Lambarka tix-raaca diiwaanka cod-bixiyaha.
 - kh. Sannadka iyo goobta dhalashada.
 - d. Jinsiga (dhedig ama lab).
 - r. Goobta doorashada uu cod-bixiyuhu ka dhiibanayo codka.
2. Qof kasta oo ay ka xumaatay ama uu ka lumay kaadhka cod-codbixinta, guddigu marka uu hubiyo in qofku diiwaan-gashan yahay, waxaa la siinayaa kaadh cusub.
3. Nuqulada ka mid ah diiwaanka cod-bixiyeyaasha waxa la siinayaa Wasaaradda iyo ururada/axsaabta siyaasadda.



4. Gobol kasta waxa la siinayaa nuqulada cod-bixiyeyaasha degmooyinka iyo goobaha gobolkaas khuseeya.

Qodobka 25-aad
Lumidda Kaadhka Cod-Bixinta

1. Qof kasta oo uu ka lumo kaadhka cod-bixinta, waa inuu muddo aan ka badneyn laba todobaad ku war-geliyaa saldhiga booliska ee ugu dhow.
2. Boolisku markuu hubiyo lumidda kaadhka cod-bixinta, wuxuu soo siinayaa codsadhaha caddayn ku socota xafiiska guddiga gobol ama degmada ay khuseyso.
3. Xafiiska guddigu ama wakiilka heer degmo ama gobol bil gudaheeda ayuu ku siinayaa cod-bixiyaha kaadh cusub oo leh tix-raaca kii lumay.
4. Qofka uu ka xumaado kaadhka cod-bixiyaha waa inuu geeyaa codsi uu ku lifaaqan yahay kaadhkii xumaaday xarunta Guddiga.
5. Ugu yaraan labo (2) bilood ka hor doorashada, Guddigu wuxuu baahinayaa waqtiga ay isdiiwaan-gelin karaan muwaadiniinta buuxiya shuruudaha diwaan-gelinta ee sharcigu qeexayo.

Qodobka 26-aad
Wax-Ka-Bedelka Diiwaanka Cod-Bixinta Rasmiga Ah

1. Guddigu wuxuu wax-ka-bedel ku samayn karaa diwaanka kama dambeyska ah saddex (3) bilood ka hor doorasha kasta, haddii munaasib uu u arko.
2. Waxaa diiwaanka lagu darayaa muwaadiniinta buuxiyey shuruudaha diiwaan-gelinta ee aan ku jirin diiwaankii hore, waxaana laga saarayaa inta geeriyootey ee ku jirtey diiwaankii hore.
3. Muwaadiniinta doonaya in ay wax-ka-bedelaan xogtooda shakhsi sida sawirka qofka iyo goobta codaynta, waxaa fursad loo siinayaa in ay wax-ka-bedelkaasi samayn karaan muddada doorashada ka horeysa, waana in ay saxiixayaan foomka wax-ka-bedelka xogta qofka.
4. Muwaadiniinta ku jira liisaska cod-bixiyeyaasha ee kama dambeysta ah oo kaliya ayaa xaq u leh codeynta.



Qodobka 27-aad
Reebanaanta Hal Kaadh Wax-Ka-Badan

Waxaa reeban:

1. In cod-bixiyaha uu qaato hal kaadh wax-ka-badan.
2. In cod-bixiyaha uu ka been sheego xogtiisa shaqsiga ah ee diiwaanka loo geliyey.

Qodobka 28-aad
Xogta Khaldanta

Haddii xog khaldani ku jirto diiwaanka cod-bixinta ee kama dambeysta ah, wax saameyn ah ku yeelan mayso dhaqan galka diiwaanka intiisa kale, guddiga ayaa awood u leh sixidda xogaha khaldan, inta aan la gaarin doorashada xigta.

QEYBTA 6-AAD

WACYI-GELINTA DIIWAAN-GELINTA

Qodobka 29-aad

Wacyi-Gelinta Diiwaan-Gelinta Cod-Bixiyeyaasha

1. Guddigu wuxuu diyaarinayaa qorshe wacyi-gelin dadweynaha ah, si loogu baraarujiyo muhiimadda diiwaan-gelinta iyo habka ay isu-diiwaan-gelin karaan, wuxuuna isticmaali hababka ugu fudud ee dadka loogu gudbin karo wacyi-gelinta sida; suugaan, farriimaha saxaafadda, baraha bulshada, taleefanada, boorar iyo cod baahiyeyaasha wareega iwm.
2. Wacyi-gelinta diiwaan-gelinta waxaa lala kaashanayaa xirfadleyda fanka iyo suugaanta, wax-garadka, ururada/axsaabta siyaasadda iyo ururada aan dawliga ahyn (NGOs).

Qodobka 30-aad

Wacyi-Gelinta

Wacyi-gelintu waa inay ahaataa mid si fudud ugu gudbisa dadweynaha arrimaha soo socda:

- b. Shuruudaha diiwaan-gelinta (eligibility criteria);
- t. Hannaanka diiwaan-gelinta;
- j. Waraaqaha aqoonsiga ee qofka looga baahan yahay;
- x. Goobta iyo saacadaha diiwaan-gelinta;
- kh. Waqtiga kama dambaysta ah ee qofku is-diiwaan-gelin karo;
- d. Ilaalinta anshaxa goobta diiwaan-gelinta.



QAYBTA 7-AAD

QODOBO GUUD

Qodobka 31-aad

Lahaanshaha iyo Haynta Diiwaanka

- 1) Diiwaanka cod-bixinta wuxuu ka mid yahay hantida Dawladda Puntland.
- 2) Urur/xisbi kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu la socdo habaynta, dhaqan-gelinta iyo daabacaadda liisaska diiwaanka.
- 3) Kaydinta iyo maamulidda diiwaanka cod-bixinta (voter registry), waxaa ka masuul ah Guddiga.

Qodobka 32-aad

Ciqaabaha La Xiriira Xad-gudubyada Diiwaan-Gelinta

1. Qof kasta oo ay ku cadaato inuu qaatay hal kaadh wax-ka-badan ama si ula kac ah uga been sheego xogtiisa shaqsiga ah ee diiwaanka loo geliyey waxaa lagu ciqaabayaa xabsi ah ilaa hal (1) sano ama ganaax ah ilaa shan boqol oo doolar (\$500).
2. Qofkii is diiwaan-geliya hal mar wax-ka-badan ama qaata hal kaadh wax-ka-badan waxa uu luminayaa xaq cod-bixinta doorashada waqtigaas la isu diiwaan-gelinayo.
3. Muwaadinka lumiyey fursadda diiwaan-gelinta, waxa uu isu diiwaan-gelin karaa doorashada xigta.
4. Qof kasta oo hawl-wadeen ka ah hawlaha diiwaan-gelinta ee ku xad-gudba qodobada xeerkan, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi u dhexeeya saddex (3) sano ilaa shan (5) sano.
5. Qof kasta oo been abuura kaadhka diiwaan-gelinta waxaa lagu xukumayaa ciqaab xabsi ah oo u dhexeysa saddex (3) sano ilaa shan (5) sano.

Qodobka 33-aad

Reebanaanta Olole Ka-Samaynta Goobta Diiwaan-Gelinta

Waxaa reeban in goobta diiwaan-gelinta lagu sameeyo olole iyo xayeysiin urur/xisbi siyaasadeed.

Qodobka 34-aad

Xeer-Nidaamiyeyaal

Guddigu waxa uu soo saari karaa xeer-nidaamiyeyaal lagu fuliyo xeerkan oo la xiriira:

1. Arrin kasta oo uu xeerkani qeexaayo in xeer nidaamiye loo sameeyo.
2. Hir-gelinta iyo fulinta hawlaha ku xusan xeerkan.



3. Wixii kale ee loo arko inay muhiim u yihiin in lagu guuleysto ama sare loogu qaado ujeeddooyinka xeerkan.

Qodobka 35-aad

Burin/Laalid

1. Waxaa la buriyey xeer iyo xeer-nidaamiye kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin xeerkan.
2. Wixii laga waayo xeerkan waxaa loola noqonayaa sharciyada kale ee aan ka hor-imaanayn Dastuurka Puntland.

Qodobka 36-aad

Dhaqan-galka Xeerkan

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

